

Hannaanka
Doorashada
Soomaaliya ee
2016-ka



Waa maxay danta laga leeyahay geeddi-socodka doorashada 2016-ka?

Sida ku qeexan dastuurka ku meel gaarka ah, muddada Baarlamanka dowladda Federaalka ah iyo **Madaxweynaha Dowladda Federaalka** waxaa ay ku egtahay sanadka 2016-ka. Sidaasi darteed waxaa laga maarmaan ah kala-guur siyaasadeed ee loogu cusbooneysiinayo hay'adaha siyaasadeed ee dalka.

Maadaama doorasho hal qof iyo cod weli aysan suurtagal ahayn, waxaa ka sameeyay hannaan doorasho ee lagu xaqiijinayo in 2016-ka ay dhacdo doorasho si fiican looga qayb galay, markii loo eego doorashadii 2012-ka, iyo si loo gaaro doorasho qof iyo cod ee **2020-ka**.

Sidee loo qoondeeyay kuraasta Golaha Shacabka ee Barlamaanka Federaalka ah ee Soomaaliya?

Barlamaanka Federaalka ah ee xiga waxaa uu noqon doonaa mid ay u wada dhan yihiin Soomaalida iyo gobollada.

275-ta kuraas ee Golaha Shacabka ayaa mar kale lagu qaybsanayaa nidaamka **awood-qaybsiga beelaha ee afar dhibic shan (4.5)**.


135 Oday dhaqameed ayaa soo xulaya 275-ta xubnood ee ergooyinka doorashada. Ergooyinkan doorasho oo midkiiba ka kooban 51 xubnood ayaa dooraan doona 275 xubnood ee Golaha Shacabka.



Sidee loo kala qoondeeyay kuraasta Aqalka Sare ee Barlamaanka Federaalka ah ee Soomaaliya?

Aqalka Sare waxaa uu matali doonaa dowlad goboleedyada dhisan iyo kuwa dhismi doona.

Madaxda dowlad goboleedyada ayaa kursi waliba u soo magacaabi doona ugu yaraan labo musharrax, kaddibna xildhibaannada maamul goboleedyada ayaa u codeyn doona xubnaha ka mid noqon doona Aqalka Sare.



Tiraada kuraasta ee goobaha codeynta

| Dowladda Federaalka iyo xubnaha maamullada ee la soo dhisayo | <i>Kuraasta Aqalka Hoose</i> | <i>Goobaha ay codbixinta ka dhacayaan</i> | <i>Ergooyinka Kulliyadda Doorasho.</i> |
|--|------------------------------|---|--|
| Puntland | 37 | Garowe | 1,887 |
| Galmudug | 36 | Adado | 1,836 |
| Jubaland | 43 | Kismayo | 2,193 |
| HirShabelle | 37 | Jowhar (tentatively) | 1,887 |
| South West | 69 | Baidoa | 3,519 |
| Somaliland | 46 | Mogadishu | 2,346 |
| Banaadir | 7 | Mogadishu | 357 |
| Total | 275 | | 14,025 |

Shakhsi kaste miyaa loo oggol yahay in uu ka qayb qaato codbixinta doorashooyinka 2016?

Maya. Hannaanka doorashada 2016-ka ma ahan doorasho qof iyo cod oo hal-beeg caalami ah waayo xaaladda ayaan saamaxeynin in la qabto doorasho noocaasi ah. Hase yeeshe, waxaa dhici doona hannaan doorasho ee dadban ee lagu dooranayo baarlamanka federaalka ah ee xiga.

Waxaa 275-ta xubnood ee Golaha Shacabka ee Baarlamanka Federaalka ah ee Soomaaliya dooran doona **275 ergo oo midkiiba** ka kooban **51 xubnood** oo ay soo xuleen **135 Oday Dhaqameed**.

Tirada guud ee ergooyinka ee ka qayb **qaadanaya doorashada waa 14,025.**

Sidee loo soo xuli doonaa ergooyinka doorashada?

Ergooyinka waxaa soo xuli doona **135 Oday dhaqameed iyaga** oo la tashanayo hoggaanka jufooyinka iyo nabaddoonada, waxaa ayna matali doonaan dhammaan jufooyinka kuraasta ay ka dhaxeeyso.



Waa maxay kaalinta oday dhaqameedyada?

135-ta Oday Dhaqameed waxaa mas'uuliyad ka saaran tahay in ay beelhooda ka soo xulaan ergooyin doorasho iyada oo loo marayo waddo khaas ah. Waxaa shardi ah in ugu yaraan 16 haween ah iyo 10 dhallinyaro ay ka **mid noqdaan 51-ka ergo**.

Yaa u tartami kursi?

Qof kaste oo **muwaddiin Soomaaliyeed ah** oo ka soo jeeda jufooyinka ay ka dhaxeeyso kursiga, **ugu yaraan 25 jir ah**, haysto shahaado dugsi sare ama waayo-aragnimo u dhiganta ayaa codsan karaa in loo diiwaan-geliyo in uu tartamo xildhibaannimo.

Musharrax kaste oo rag ah waxaa looga baahan yahay in **uu bixiyo \$5,000** oo ah lacagta isdiiwan-gelinta, halka dumarka laga rabo in ay bixiyaan lacag dhan **\$2,500**.

Xaggee bay doorashooyinka ka dhacayaan?

Codeynta waxaa ay ka dhacaysaa Cadaado, Baidhabo, Garowe, Kismayo iyo sidoo kale Muqdishu oo lagu qabanayo doorashooyinka beelaha reer Banaadir iyo beelaha Somaliland.

Goobta lagu qabanayo doorashada xubnaha parlamaanka ka soo jeedo Hiiraan iyo Shabeellaha Dhexe weli lama go'aamin.



Yaa maamuli doono doorashooyinka?

Gudigga Federaalka ee Hirgelinta Doorashooyinka Dadban oo ka kooban 22 xubnood ayaa mas'uul ka ah kormeerka guud iyo qorsheynta hannaanka doorashooyinka si loo xaqiijiyo in ay dhacdo si isku mid ah. Toban ka mid ah xubnaha Guddiga Federaalka ah ee Hirgelinta Doorashooyinka Dadban waxaa soo xulay Dowladda Federaalka, halka 12-ka xubnood waxaa magacaabay maamullada dhisn iyo kuwa dhismaya.

Toddoba ka mid ah 22-ka xubnood waa haween(32 boqolkiba).

Heer maamul goboleed, waxaa la dhisay **6 Guddiyada Dowlad Goboleedyada ee Hirgelinta Doorashooyinka Dadban (GDGHDD)** si ay hannaan doorasho uga hirgeliyaan dowlad goboleedyada dhismaya.

Waxaa sidoo kale Banadir loo sameyn doonaa GDGHDD. Guddi kaste ee GDGHDD ka mid waxaa uu ka kooban yahay 11 xubnood oo ay 8 ka mid ah ay soo magacaabeen dowlad goboleedaya, halka 3-da kalena ay soo xushay **Dowladda Federaalka** ah.

Goormaa ayay Soomaaliya yeelan doontaa doorasho hal-beeg caalami ah ee qof iyo cod?





Soomaaliya waxaa lagu wadaa in doorasho qof iyo cod ay ka hirgasho sanadka 2020, waxaana maamuli doona **Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyin Qaran.**



Side hannaankan doorasho ee 2016-ka uga duwan yahay doorashadii 2012-ka?

2012 Selection Process

2016 Electoral Process

| | | |
|--|---|---|
| <p>135 oday dhaqameed ayaa doortay barlamaanka hadda jira.</p> |  | <p>In ka badan 100 jeer ee Soomaalida ka qayb qaadatay doorashada 2012 ayaa ka qayb qaadanaya geddi-socodka doorashada sanadkan. 14,025 xubnood ee ka tirsan 275 ergo doorasho ayaa dooran doona xubnaha Golaha Shacabka.</p> |
| <p>Sanadka 2012-ka waxaa kaliya la doortay baarlamaan hal aqal kaliya ka kooban.</p> |  | <p>Sanadkan waxaa la dooranaya xubnaha 2 Aqal ee baarlamanka.</p> |
| <p>Codeynta xubnaha barlamaanka waxaa lagu qabtay Muqdisho kaliya.</p> |  | <p>Kuraasta Aqalka Sare ee barlamaanka cusub waxaa loo qoondeeyay nidaam ku saleysan maamullada iyo gobollada. Cod bixinta waxaa ay ka dhaceysaa ugu yaraan 6 magaalo eek u yaalo oo ay Muqdisho ku jirto.</p> |
| <p>Ma aysan jirin sanduuqa qarsoon.</p> |  | <p>Codeynta xubnaha Golaha Shacabka waxaa ay noqon doontaa mid qarsoodi ah.</p> |

Geeddi-socodka doorashooyinka Soomaaliya ee 2016 waxaa lagu wadaa in ay noqoto mid ka daahfuran oo looga kalsoonaan badan yahay doorashooyinka hore.

Madasha Hoggaanka Qaran waxaa ay asaastay **Guddiga Xallinta Khilaafaadka Doorashada Dadban** ee looga dan leeyahay xallinta khilaafaadka.

Guddiga waxaa uu ka kooban yahay **25** qof ayaga oo garab ka helaya dhowr la taliyeyaal caalami ah.



GUDDIGA XALLINTA KHILAFAADKA

HABKA UU U SHAQEEYO

Tallaabada 1-aad

U gudbi cabshadaada guddiga Xallinta Khilaafaadka Doorashooyinka. Dhammaan goobaha cod-bixinta waxaa la geyn doonaa xubno ka tirsan guddiga.

Tallaabada 2-aad

Cabashada waxaa kaliya gudbina karaa musharraxiinta. Si aad cabashaada u gudbisid, waxaa aad hore u bixineysa lacag dhan \$1,000 (doolar).

Tallaabada 3-aad

Guddiga Xallinta Khilaafaadka Doorashooyinka waxaa uu eegaya una tixgelinaya cabashada aad soo gudbisay.

Waxaa kaliya cabashada gudbin karaa musharraxiinta. Si aad u cabasho u gudbisidna, waa in aad hore u bixisaa lacag dhan

1000 US Doolar



GUDDIGA XALLINTA KHILAAFAADKA

Waa maxay waxa cabasho loo qaadan karo?

Waxaa ay xallin karaan khilaafaadka la xiriira:

- ✦ Tillaabooyinka ay qaadeen kooxaha xallinta khilaafaadka doorashooyinka dadban ee heer dowlad-goboleed.
- ✦ Cabsigalin la cabsi galiyay ergooyinka ama musharraxiinta.
- ✦ Kala iibsiga codadka.
- ✦ Khilaafaadka la xiriira ku dhawaaqista natiijooyinka.
- ✦ Tirinta codadka.

Dhammaad